

Xuquuqda Macaamiisha


Waxaad xaq u leedahay:

1. In lagu siiyo tixgelin
2. Inaad ka qayb qaadato qorshaynta xanaandaada
3. Inaad filato in xogtaada oo dhan kuu qarsoonaato
4. Inaad xor ka ahaato xadgudub jirkaaga ama maskaxdaada
5. Inaad cabasho gudbin karto
6. Inaad ogaato lacagta ay bixiyaan Mainecare iyo Medicare iyo in adiga lacag lagaa doonayo
7. Inaad racfaan ka qaadato haddii afeeg lagu diido, ama adeegga lagu siiyaa aanu kugu fillayn
8. **Hayaduhu waa in:**

ku siiyaan qoraal xuquuqda aad leedahay ah intaan adeeg lagu siin

Kuu sii sheegaan intaan wax laga badalin adeeggaaga

In si sugan laguula socodsiiyo intaan lagaa goyn adeegga lagu siiyo



Waxa uu u doodaa Xuquuqda Macaamiisha u Baahan Xanaano Caafimaad Waqti Dheer

Barnaamijka Afbayeenka Caafimaad (Ombudsman) ee Xanaanda Waqtiga Dheer ee Maine

61 Winthrop Street
Augusta, ME 04330

207-621-1079 (cod/dhagoolaha)
1-800-499-0229 (codka/dhagoolaha)
Fax 207-621-0509 (cod/dhagoolaha)
MLTCOP@MaineOmbudsman.org

www.maineombudsman.org

3/12/2014

Afhayeen u doodaa dadka guryahooda xanaanada lagu siiyo waqtiga dheer



Barnaamijka Ombudsman ee u dooda dadka ku jira Xanaanada waqtiga dheer ee Maine

**1-800-499-0229
(cod/dhagoolaha)**

Halkeen kaalmo u doonan karaa?

Waxaad aadi kartaa Barnaamijka Afhayeenka Caafimaad (Ombudsman) markaad u baahato af-hayeen Waxaan u taaganahay macaamiisha u baahan xanaano caafimaad ee waqti dheer

Nasoo gaarsii haddii***

- Si xun oo laguula dhaqmo iyo dayacaad
- Sidaad u heli lahayd xanaano guriga ah
- Adeegyada aad u baahan tahay ee kuugu jira qorshahaaga xanaano
- Adeeggu hadduuna kugu fillayn
- Qalabka aad u baahantahay
- Adeegga oo la joojinayo
- Rafcaan qaadasho
- Wixii dhib ah ee ku saabsan Medicare iyo Medicaid
- Wixii dhib ah eek u saabsan bixinta kharashka

Soo raadso kaalmo haddii....

- Aadan ku qanacsanayn xanaanada lagu siiyo
- Qof uu ku xadgusbo xuquuqda, caafimaadka, nabadgeliyada, ama xasiloonida dadka la xanaaneeyo.

Waa Maxay “Ombudsman”?

Waa eray asalkiisu ka soo jeedo afka Iswiidhishka oo loogu dhawaaqo Om budhsman waana waana afhayeen si gooni ah loo tababaray sharcina ka haysta Dowladda Dhexe iyo ta Maine si uu u baadho una xalliyo cabashooyinka ay soo gudbiyaan dadka la siiyo xanaanada caafimaadka ee waqti dheer qaadata ama wakiilkoodu.

Waxaad xaq u leedahay inaad soo gudbiso cabashooyinkaaga***

Soo wac afhayeenka caafimaad (ombudsman) haddii wax su'aal ah ama walwal ah aad ka qabto xanaanada lagu siiyo.

Wixii xiriir ee aad nala samaysaa waa qarsoodii.

Adeegga aan qabanaana waa bilaash.

Yaa kaalmo codsan kara?

- Qof kasta oo u baahan inuu kor u qaado tayada dadka xanaanada la siiyo.
- Qofka adeegga hela laftisa
- Shaqaalaha ama maamlka hay'adaha adeega siiya
- Saaxiibka, dariska ama qaraabada qofka la siiyo xanaanada
- Shaqaalaha hay'adaha arrimaha bulshada

Barnaamijka Ombudsman Wuxuu kaa Caawin Karaa inuu...

- Kaaga jawaabo su'aalaha aad qabto
- Macamiisha ka caawiyo si ay u fahmaan xanaanada guryaha ee dhibka badan
- Kuu sharxo habka qiimaynta
- Ku siiyo warbixin
- Inuu baaro xalliyana cabashooyinka ku saabsan xanaanada guryaha lagu bixiyo
- Inuu u dooda macaamiisha xanaanada hela
- Inuu ka caawiyo rafcaanka
- Inuu ilaaliyo xuquuqdooda
- Inuu Dowladda Dhexe iyo Gobolka uga doodo xuquuqda dadka hela xanaanada, si loo hagaajiyo xeerarka, nidaamka iyo xeer hoosaadyada ku saabsan dadka hela xanaanada guryaha lagu qaato.

Afhayeenkayagu waxay awoodaan inay:

- Ka jawaabaan wixii su'aal ah, baaraan, xalliyaanna cabashooyinka ku saabsan xanaanada lagu bixiyo guryaha
- Kugu soo booqdaan guriga si kaagala hadkaan wixii dhib ah
- Kaa caawiyaan markaad rafcaan ka qaadanayso go'aan lagu dhimayo adeegga lagu siiyo, lagaaga goosanayo ama uuna kugu fillayn adeegga lagu siiyaa.